## Vilification halis ah

Haddii xadgudubyada ay ku jiraan hanjabaad ah in qof ama hantidooda waxyeello loo geysanayo, ama lagu dhiirrigelinayo dadka kale in ay qofka ama hantidooda waxyeelo jireed u geystaan, markaas waa fal dambiyeed. Tan waxaa loogu yeeraa xadgudub khatar ah, waana in booliska loo soo gudbiya.

### Tusaale:

Inta lagu guda jiro isu soo bax nabadeed, qof aanan qeyb ka ahayn isusoo baxaas ayaa ku hanjabay in qalalaase loo geysto kooxdaas, wuxuuna dadka kale ku dhiirigeliyay inay sidaas oo kale sameeyaan.Hanjabaadahan rabshadaha ahi waxay ku saleysan yihiin kooxdan aqoonsiga diintooda iyo jinsiyadooda.

Qofka lagu xukumay xadgudub aad u daranwuxuu la kulmi karaa suurtagalnimada xukun xabsi ah waxaa suurtagal ah in lagu xukumo saddex sano oo xabsi ah.

## Waxa aad filan karto marka aad xog soo gudbiso

Marka aad rabto inaad soo sheegto dhacdo, waa in aad sheegtaa goobta aad joogto aadnasharaxdaa wixii aad la kulantay ama aad goob joog ka ahayd. Marka u horeysa ee la sameynayo baaritaanka, waxaa laga yaabaa inay booliiska wareystaan dhibbanayaasha iyo markhaatiga, ay roraan macluumaadka, qiimeyaan baahida loo qabi karo in la ilaaliyo dhibbanaha, iyo inay uruuriyaan caddeymaha muuqda. Inkastoo aan codsan karto inaan magacaaga la sheegin, waxaa laga yaabaa inay saameyso sida ay booliska u sii wadi doonaan baaritaanka. Waxa lagugu dhiiri gelinayaa in aad soo sheegto wixii danbiyo ah oo la xiriira nacaybka ee hareerahaaga ka dhaca.

## Qaababka aad xogta usoo gudbin karto

Haddii aad aaminsan tahay in dembi adiga laguu geystay ama dembi qof kale loo geystay, ay sabab u ahayd nacayb, waxaad usoo sheegi kartaa sidan soo socota:

- **Xaalad degdeg ah:** Haddii dembigu uu markaas ayada ah dhacayo, wac Lambarka Saddexda Ebar (000).
- **Booliska:** Kusoo sheeg dal-dambiyeedka qaab online ah adoo booqanaya police.qld.gov.au/policelink-reporting ama taleefan 131 444.
- **Dambi-joojiyeyaalka (Crime Soppers):** Marka aad fal dambiyeed aan xaalad degdegga ahayn ama aad waxyaabo aad ka shakisay soo sheegayso adoo rabaya in cida aad tahay aan la ogaan waxaad booqataa crimestoppersqld.com.au ama wac lambarka 1800 333 000.
- **Qaab shaqsiyan ah: D**embiga si shakhsiyan ah ayaad ugu soo sheegi kartaa saldhig kasta oo booliska.

Waxaad sidoo kale lasoo xiriiri kartaa **Queensland Human Rights Commission** adoo wacaya lambarka 1300 130 670 ama online ka qhrc.qld.gov.au.

Queensland Human Rights Commission

Queensland Government

Queensland Human Rights Commission

Queensland Government

# Dambiyada nacaybka

## Ma la socotaa waxa uu sharcigu ka qabo dembiyada nacaybka?



Aqoonso adiga **xuquuqahaaga** iyo qaababka la heli karo **warbixinta loo soo gudbin karo.**

## Inaad fahamto dambiyada nacaybka

Denbiga nacaybka waa fal dambiyeed ku saleysan nacayb waxaana loo geysan karaa qof ama koox shaqsiyaad ah iyadoona lagu saleynayo eexasho ama eex ka dhan ah astaamaha lagu yaqaan dadkaas

Dembiyada nacaybka waxaa ka mid noqon kara:

- **Erayo caay ah ama habdhaqan**
  in magacyo loogu waco ama hanjabaad toos ah ee la xiriirta astaamaha u gaarka ah ayaga
- **Weerar jireed ama dagaal**
  Feedh, garaacid, cundhuufayn, dharbaaxid, laadis, in la adeegsado hub, kufsi, dil ama hanjabaad
- **in hanti la waxyeeleeyo**
  Wax la jajabiyo, dab qabadsiin, qoraalo aflagaado ah oo meelo lagu qoro qabuuraha oo la faagto, ama goobaha cibaadadada oo la weeraro
- **Hagardaamo**
  Cabashooyinka beenta ah, dabagalka, wicitaanada telefoonka ee joogtada ah, emails ama fariimaha qoraalka ah
- **Dambiyada internetka**
  Farriimaha ama qoraallada nacaybka ah ee lagu beegsanayo dadka ama kooxaha laga tirada badan yahay, oo ay ku jiraan baraha bulshada kuwaas oo si toos ah kuu saameynaya.

Dembiyada necebka waxay bartilmaameedsadaan astaamaha u gaarka ah dhibbanayaasha waxaana ka mid noqon kara:

- **Jinsiyada/midabka**
- **Galmada**
- **Astaamaha jinsiga**
- **Diinta**
- **Aqoonsiga Jinsiga**

Waxaan ku dhiirigelinaynaa qof kasta oo la kulma dhacdo ku salaysan nacayb inay usoo sheegaan booliska.

> **Tusaale:**
> mulkiile dukaan oo dukaankooda dariishadiisa la jabiyay macaamiil sababo la xiriira aqoonsiga jinsiyadooda.

## Inaad fahamto takooridda iyo aflagaadada sharci darrada ah

Sharciyada takoorista ee Queensland waxay ku saabsan yihiin in si cadaalad ah loola dhaqmo dadka oo dhan. Haddii si cadaalad darro ah laguula dhaqmo sababo la xiriira wax adiga kugu saabsan,, waxaa laga yaabaa inay noqon karto takoor ama aflagaado sharci darro ah. Inkastoo aanay dhacdooyinkaasi soo buuxinayn shuruudaha fal dambiyeedka, dhaqamadaas hadana weli waa mamnuuc sida uu qabo sharciga Queensland.



Aflagaadada sharci darrada ah waa marka qof uu si cad u kiciyo nacayb, quudhsi dhab ah ama jees-jees daran oo qofka loo geysto sababo la xiriira midabkooda, diintooda, jinsigooda, astaamaha jinsiga ama aqoonsigooda jinsiga ah. Arrimahaan waxaa ka mid ah waxyaabaha sida xadgudubka internetka ama in qof dariiqa lagu dhibaateeyo.

> **Tusaale:**
> Qof kasoo jeeda dhaqanka wadanka lagu yaqaan mid aan ahayn oo ka qeybgalaya kooras tababar oo wayn ayaa waxaa loogu yeeray magacyo isir aflagaadeyn ah iyadoo uuna sidaas sameeyay madaxa tababaraha sidaasna kana hor dhahay tababarayaal kale iyo xubno ka qeybgalayay kooraska, taasoo keentay in lagu qoslo hadalada aflagaadada.

Takoorista waa marka si cadaalad darro ah laguula dhaqmo adoo ku sugan goob shaqo, iskuulka, marka aad la macaamileysid dowlada ama marka aad badeeco iyo adeeg raadsanaysid, iyadoo sababta sidaas loo sameynayana ay tahay astaamo gooni ah sida midabkaaga, jinsigaaga, naafonimadaada, ama diintaada.

> **Tusaale:**
> Hey'ad wax kiraysao oo diiday in ay guri ka kireeyaan lamaane isku jinsi ah inkastoo ay ahaayeen dadkii ugu mudnaa inta codsiga soo gudbisatay.

Waxaad heli kartaa warbixin dheeraad ah ama sameyn kartaa cabasho adigoo la xiriiraya Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Queensland.